www.hel.fi/terveyskeskus

Magaalada Helsinki
**Xarunta caafimaadka**

# Baaritaanka la socodka ah ee intuu uurku bilowga yahay la baaro cilladda Down Syndrome - Ma rabtaa inaad ka qaybqaadato?

Ujeedada laga leeyahay qoraalkan wargelinta ah waa inuu kaa caawiyo sidii aad go'aan uga gaari lahayd, inaad rabto inaad ka qaybqaadato baaritaanka la socodka ah (seulontatutkimus) ee lagu baaro inay jirto jirradda cilladda Down syndrome (Downin oireyhtymä). Baaritaanku wuxuu ku salaysan yahay habka baaritaanka aalladda codka sare (ultraäänitutkimus) iyo hab ah hooyada oo saami dhiig ah laga qaadayo. Baaritaankan iyadoo la kaashanayo ayaa waxaa suuragal ah, in wakhtiga hooyada uurkeedu bilowga yahay la ogaado in aad u badan oo ka mid ah ilmaha caloosha ku jira ee leh cilladda Down syndrome[1)].

***Qofku wuu u madax bannaan yahay ka qaybqaadashada baaritaanka la socodka ah iyo haddii baaritaanno kale loo baahdo ka qaybqaadshadooda.***

**Baaritaanka la socodka ah ujeedadiisu waa** in la ogaado oo baaritaanno kale loo sii diro dumarka uurka leh ee ay suuragalka tahay in ilmaha calooshooda ku jiraa uu noqon karo mid leh cilladda Down syndrome. Marka la qiyaasayo siday suuragal u tahay inuu ilmaha caloosha ku jiraa noqon karo mid leh cilladda Down Syndrome, waxaa la fiiriyaa hooyada uurka leh da'deeda, intay le'eg tahay baaxadda bararka jeegada (qadaadka) ee ilmaha caloosha ku jira oo lagu ogaado baaritaanka aalladda codka sare (ultraäänitutkimus), iyo caddadka waxyaabaha astaamaha ah (tracer) oo laga arko dhiigga hooyada laga qaaday[2)]. Siday suuragalka u tahay inuu ilmaha uurka ku jiraa noqon karo mid leh cilladda waxaa kama dambaysta xisaabiya **barnaamij kombiyuutareed loogu** talagalay. Haddii baaritaanka la socodka ah maxsuulka ka soo baxaa uu noqdo mid boositif ah, markaas macneheedu waa; waxaa kordhay siday suuragal u tahay in ilmaha caloosha ku jiraa uu qabo cudurka cilladda Down syndrome.

Baaritaanada la socodka ah ee la sameeyo boqolkiiba shan (5%) ayaa maxsuulkoodu wuxuu noqdaa boositif, taasna macneheedu waa; waxaa kordhay siday suuragal u tahay in ilmaha caloosha ku jiraa uu noqdo mid leh cilladda Down Syndrome. Carruurta caloosha ku jirta ee laga helo cilladda Down Syndrome, in ka badan 80% ayaa waxay ka mid yihiin kooxdan boqolkiiba shanta ah. Hase yeeshee arrinta wanaagga leh ee la ogaadey baa waxay tahay, in baaritaannada la socodka ee boositifka ah intooda badan, ilmaha caloosha ku jiraa ma laha cilladda Down Syndrome.

Nidaamka hadda la isticimaalo ayaa ka fiican nidaamka baaritaanka la socodka ah ee ku salaysan da'da hooyada oo keliya. Sidaas ayaana si fiican loogu ogaan karaa dumarka uurka leh ee ay korodhay khatarta ah, in ilmahooda caloosha ku jiraa uu yeelan karo jirrada ah cilladda Down Syndrome. Hooyooyinka lagu ogaado baaritaanka la socodka ah waxaa haddii ay rabaan loo sii diri karaa, **baaritaanno kale oo dheeraad ah**. Baaritaannada kale ee dheeraadka ah waxa loola jeedo waa baaritaanno lagu samaynayo koromosoomyada ilmaha caloosha ku jira, iyadoo ilmaha caloosha ku jira unugyadiisa baaritaan lagu samaynayo, saamiga la baarayana waxaa laga qaadaa mandheerta ama biyaha ilmaha. Haddii la ogaado in ilmaha caloosha ku jiraa



leeyahay jirrada cilladda Down Syndrome, markaas qoyska waxaa suuragal u ah inay diyaar u noqdaan, in ilmaha dhalanayaa uu yahay mid leh jirrada Down Syndrome, ama qoysku waxay go'aansan karaan in ilmuhu aanu dhalan oo uurka la joojiyo (aborshan la sameeyo), taas oo siduu sharciga Finland dhigayo suuragal ah ilaa intuu uurku ka gaarayo todobaadka 24aad.

## Rugta daryeelka caafimaadka hooyooyinka ayaa hooyada u diri karta baaritaanka la socodka (Neuvolan lähetteellä seulontaan)

Bolikiliniga hooyooyinka ee isbitaalka lagu ummulo ayaa lagu sameeyaa baaritaanka la socodka ah ee loogu talagalay dumarka ay soo gudbisey rugta daryeelka caafimaadka hooyooyinka, dumarkaas oo ah kuwa ay khatar tahay in ilmaha calooshooda ku jiraa yeelan karo cilladda. Marka hooyada uurkeedu yahay 10-12 todobaad ayaa waxaa marka hore la sameeyaa baaritaanka aalladda codka sare (ultraäänitutkimus), baaritaankaasna waxaa lagu ogaadaa ilmaha caloosha ku jiraa intuu le'eg yahay iyo inta ballaarka bararka jeegada (qadaadka) ee ilmaha caloosha ku jiraa yahay. Isla maalintaas ama maalin ku dhow ayaa hooyada waxaa laga qaadaa dhiig. Dhiigga waxaa laga ogaadaa caddadka waxyaabaha astaamaha ah (merkkiaineiden pitoisuudet). Barnaamij kombiyuutarka ah ayaa xisaabinaya caddadka khatarta suuragalka ah intuu le'eg yahay. Qofka marka dhiigga laga qaado, todobaad ka dib ayey jawaabtu diyaar noqonaysaa.

**Haddii baaritaanka la socodka maxsuulka ka soo baxaa noqdo negatif, taas oo macneheedu yahay inay hoosayso siday suuragal u tahay** in ilmaha caloosha ku jiraan yeelan karo cilladda Down Syndrome, markaas hooyada waxaa loo diraa warqad maxsuulka loogu sheegayo. Taas oo macneheedu yahay in siday suuragal u tahay in ilmaha caloosha ku jiraa yeesho cilladda Down Syndrome way ka yar tahay tan hooyada 35 sano jirta da'deeda oo keliya la xiriirta (caddadka khatartu wuu ka yar yahay 1:250).

Qiyaastii 95% ka mid ah hooyooyinka mara baaritaanka la socodka, maxsuulka baaritaankoodu waa negatif. Laakiin xitaa haddii maxsuulka baaritaanka la socodku yahay negatif, macneheedu maaha inay hubaal tahay in ilmaha caloosha ku jiraa boqolkiiba boqol caafimaad qabo.

**Maxsuulka boositifka ah ee baaritaanka la socodka ah, oo ah in siday suuragal u tahay ay sii korodhay**, macnihiisu waa siday suuragal u tahay in ilmaha caloosha ku jiraa yeelan karo cilladda Down Syndrome way ka badan tahay 1:250, sidaas darteed haddii qoysku rabo waxaa suuragal ah in la sameeyo baaritaanno kale oo dheeraad ah oo lagu ogaanayo ilmaha caloosha ku jira koromosoomyadiisa. **Haddii maxsuulka ka soo baxa baaritaanka la socodku uu noqdo boositi**f, markaas Isbitaalka Naistenklinikka qaybtiisa baaritaanadda ilmaha caloosha



ku jira qaabilsan **ayaa hooyada maxsuulka telefoon ama warqad ugu soo sheegaya**, isla markaasna waxaa kaloo hooyada loo sheegaa waxyaabaha la xiriira baaritaannada kale ee dheeraadka akh ee loo baahan yahay, haddii loo baahdana waxaa loo qabanaya ballan ah wakhtiga baaritaannada kale ee dheeraadka ah la samaynayo.

Cilladda Down Syndrome waxaa si hubaal ah looga ogaan karaa unugyada ilmaha caloosha ku jira oo keliya. Ilmaha caloosha ku jira unugyadiisa marka la baarayo, saamiga la baarayo waxaa laga qaadaa mandheerta ama biyaha ilmaha. Labada hab ee baaritaanka ahba waxaa la xiriira khatar yar oo ah inuu ilmuhu caloosha ku jiraa soo dhaco, khatartu waa (in ka yar 1%), sidaas darteed waxaa muhiim ah in dumarka loo dirayo in saami laga qaado ay ahaadaan, dumarka la ogaadey inay korodhay siday suuragal u tahay, in ilmaha calooshooda ku jiraa yeelan karo cilladda Down Syndrome.

**Inta lagu jiro wakhtiga uurka**, hooyooyinkii soo maray baaritaanka la socodka ee uurka bilowgiisa, waxaa suuragal u ah inay mar kale maraan baaritaanka aalladda codka sare (ultraäänitutkimus) oo la samaynayo marka wakhtiga uurku yahay todobaadka19-21 ee uurka, si loo fiiriyo dhismayaasha ilmaha caloosha ku jira. Haddii jawaabtu caadi tahay, markaas xaaladda uurka waxaa sida caadiga ah ula soconaysa rugta daryeelka caafimaadka hooyooyinka (neuvola).

1) **Cilladda Down syndrome** waa cillad ah 21-trisomy, sababta cilladdan keentaana waa koromosoomka lambarkiisu yahay 21 ayaa wuxuu yeeshaa koromosoom dheeraad ah oo unugga lagu arko. Koromosoomka dheeraadka ah samaysankiisa waxaa sabab u ah cillad ku timaadda samaysanka ugxanta ama samaysanka isbeermada, taasoo dhacda intaanu ilmuhu abuurmin ka hor. Finland carruurta dhalata ee leh cillada Down Syndrome qiyaas ahaan waa markay lix boqol oo carruur ah oo caafimaad qabaa dhahsaan waxaa dhasha hal ilmo oo cilladda Down syndrome leh. Dadka leh cilladda Down syndrome waxay leeyihiin naafo xagga horumarka koriinka ah oo ah cillad dhibkeedu yahay xad ilaa si dhexdhedaad ah u adag (keskivaikeasti kehitysvammaiset), sida caadiaga ahna wejigoodu waa nooc gaar ah, inta badanna dadkaasi waxay leeyihiin cillad xagga wadnaha ah oo ay ku dhashaa, waxaana kordha khatarta ah inuu ku dhaco kansarka dhiigga (leukemia).

2) Haddii ilmaha caloosha ku jiraa leeyahay cilladda Down Syndrome, markaas baaxadda bararka jeegadu (qadaadku) wuu weynaadaa waxyaabaha astaamaha ahna (HCG-beeta ja PAPP-A) iyagoo caddad ahaan ka duwan kan uurka ilmaha caadiga ah ayey waxay ka soo baxaan mandheerta oo waxay raacaan wareegga dhiigga ee hooyada.